

# BE A FORCE FOR GOOD



HADDA LA  
QORAYO



## SARKAALKA BOOLIISKA

Sarkaalka Booliisku wuxuu qabtaa waajibaadyo kala duwan oo taxadiyo leh. Booliisku waxay ka shaqeeyaan inay nolosha iyo hantida ilaaliyaan, inay ogaadaan oo qabtaan danbiileyaasha, ayna caawiyaan dadka u baahan caawimaadda.

Ka dib tababarka shaqo-qoriddaada, mihnadaada ayaa ka bilaaban doona Victoria Police adoo ah konistabal tijaabada ku jira. Waxaad ku qaadan doontaa 2 sanadood adkaynta tababarkaaga iyo helidda waayo - aragnimadaada adoo ah Sarkaal Booliis ee Waajibaadka Guud kahor intaan lagu xaqiijin kaalintaas.

Saraakiisha Waajibaadka Guud waa kuwa kowaad ee goobta wixii jariimo danbi lasoo-sheego ah ama baahi dadweyne ee ah siinta adeegga bulshada Victoria 24 saac maalintii, 7 beri asbuucii.

Badiba xubnaha Victoria Police waxay u shaqeeyaan sidii Sarkaalka Booliis ee Waajibaadka Guud hase ahaatee waxaa kaloo jira kuwo qabta kaalimaha takhasuska ah kuwaas oo u baahan tababar dheeraad ah iyo badanaa ugu yaraan 2-4 sano waayo-aragnimo howlgalada waajibaadka guud oo ah shuruudaha hore.

# Muxuu qabtaa Sarkaalka Booliiska ee Waajibaadka Guud?

Hoos waxaa ku yaal liiska xaaladaha qaarkood ay tahay inaad maarayso sidii adoo ah Sarkaalka Booliisku ee Waajibaadka Guud.

- Ka-hortagga dhaqanka lidka ku ah bulshada
- Wax ka qabashada dareenada ammaanka bulshada
- Xallinta khilaafaadka
- Imaansha shilalka
- Baarista dambiyada
- Hirgelinta sharciga gaadiidka
- Wax ka qabashada dadka daroogada iyo khamriga saameeyeen
- Imaanshaha dhacdooyinka iyo degdegyada

Waxaa lagaaga baahan yahay inaad soo gudbiso waraaqaha badiba dhacdooyinkii aad soo martay, oo ay ka midka yihiin haysashada xaashida socota taas oo ah xusuus-qor socda ee waajibaadkii aad qabaty shifti kasta. Waxaa kaloo lagaaga baahan yahay inaad diyaariso waraaqaha maxkamadda aadna ka dib tagto dhagaysiga si aad u bixiso caddaynta.

## Xaq ma u leeyahay inaan noqdo Sarkaal Booliis?

Si aad ugu qalanto inaad u shaqayso sida Sarkaalka Booliiska ee Victoria Police, waa inaad yeelataa shuruudaha gelitaanka ee soo socda:

### Hayso Muwaadinimada Australia ama Deganaanshaha Joogtada ah ee Australia

#### Muuji akhlaaqda wacan iyo sumcadda

Victoria Police waxay qabtaan hubinta asalka oo ballaaran ooy ku sameeyaan codsadeyaalka inta lagu jiro habka shaqo-qoridda. Wixii macluumaad dheeraad ah oo la xiriira Victoria Police kahor tilmaamaha sooyaalka ka eeg: <http://www.policecareer.vic.gov.au/police/forms-police>

Ogsoonow: haddii aad dareen ka qabto sooyaalkaagii hore inuu saameeyo codsigaaga, waxaad u-soo-gudbin kartaa foomka muujinta folanteeriga Laanta shaqo-qoridda ee Victoria Police kahor codsashada. Ka-soo-degso foomka: <http://www.policecareer.vic.gov.au/police/forms-police>

#### Yeelo shuruudaha caafimaad ee ugu-yar

Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad kaafiso shuruudaha caafimaad ee ugu yar oo ah qorshaha caafimaad ee Victoria Police si loo qabto kaalintaas. Wixii macluumaad dheeraad ah oo la xiriira tilmaamaha caafimaadka ee Victoria Police ka eeg: <http://www.policecareer.vic.gov.au/police/forms-police>

Ogsoonow: haddii aad dareen ka qabto shuruudaha caafimaadka oo hore ujirey inay saameeyaan codsigaaga, waxaad u-soo-gudbin kartraa wax-weydiinta hore ee foomka shuruudaha caafimaadka ee Laanta La-talinta Caafimaad ee Victoria Police si qiimayn loogu sameeyo ka hor codsashada. Ka-soo-degso foomka halkan: <http://www.policecareer.vic.gov.au/police/forms-police>

#### Muuji xirfadaha Wada-hadalka Ingiriisiga ee wacan

Mid ka mid ah xirfadaha asaasiga ah oo aad u baahan doonto inaad muujiso ka codsade ahaan, waa kartidaada inaad si wacan ugu hadasho Ingiriisiga. Taas macnaheedu waa lahaanshaha kartida inaad aqriso, qorto, la dhagaysato isla markaasna af ahaan ugu hadasho Ingiriisiga heer kuu ogolaan doona inaad si hufan uqabato waxyaalo ka baxsan waajibaadka kaalinta marka lagu jiro qaabka shaqada.

Ogsoonow: Victoria Police wuxuu kaloo si gaar ah u danaynayaa codsadeyaalka leh xirfadaha wada-hadalka laba-luqadlaha kuwaas oo awooda inay kula hadlaan xubnaha dadweynaha ah luqaddooda dhalasho.

#### Keen caddaynta shahaadooyinka waxbarasho haddii aad ka yar tahay da'da 21 sano

Codsadeyaalku waa inay ka yar yihiin da'da 18 sano si ay u soo codsadaan kaalinta booliiska. Haddii aad ka yar tahay da'da 21 sano, waa inaad ku gudubtaa Victorian Certificate of Education (VCE), heerka sare ee Victorian Certificate of Applied Learning (VCAL) ama wax u dhigma kahor codsiga.

#### Hayso Laysanka Darawanimada ee Victoria

Waa inaad haysataa laysanka darawalka Australia oo jira waqtiga codsiga (laysanka maanawaalka ama atoomaatiga waa la ogol yahay).

## Waa maxay macluumaadka muhiimka ah ee kale ay tahay inaan tixgeliyo kahor intaan codsan inaan noqdo Sarkaal Booliis?

- Waxaad shaqayn doontaa 80 saacadood labadii-asbuuc adoo ka shaqeynaya dhowr shifti si aad u awoodsiiso Victoria Police inay ka jawaabaan baahiyaha bulshada Victoria 24ka saac, 7 beri asbuuciiba.
- Bilowga mihnadaada waxaa lagaaga baahan doonaa inaad ka qabato waajibka meel kasta oo Victoria ah siday garato Victoria Police.
- Waxaad la kulmi doontaa xaalado khilaaf, rabshad danbiileyaal iyo dad ay saameeyeen daroogo iyo khamri.
- Waxaa lagaa filayaa inaad gees iska dhigto aragtiyadaada shaqsiyeed, diimeed iyo siyaasadeed si aad u fuliso shuruucda dowlad-goboleedka.
- Waxaa lagaa dooni doonaa inaad qaadato hub.
- Hab-dhaqankaaga intaad waajibaadka ku jirto ama aadan ku jirin waa inuu ahaadaa heer sare aadna muujisaa qiyamka Victoria Police.
- Waxaad u baahan doontaa inaad hesho Shahaadada Gargaarka Degdegga ee Kowaad kahor intaan bilaabin Akadeemiyada kaas oo sax ku ah ilaatabarkaaga Akadeemiga iyo sannadka kowaad ee shaqada.

## Waa maxay habka codsiga ee Sarkaalka Booliiska?

Maaddaama aad tahay codsade, waxaa lagaaga baahan yahay inaad marto marxaladaha soo-socda kahor intaan lagu qaadan shaqada Victoria Police.

<b>Talaabada 1aad</b>	Soo-gudbi codsiga online ah adoo maraya <a href="http://www.policecareer.vic.gov.au/police">www.policecareer.vic.gov.au/police</a>
<b>Talaabada 2aad</b>	Hubinta xaq-u-yeelashada
<b>Talaabada 3aad</b>	Imtixaanka qaadashada
<b>Talaabada 4aad</b>	Hubinta asalka
<b>Talaabada 5aad</b>	Baarista fayoobida
<b>Talaabada 6aad</b>	Baarista maskaxeed
<b>Talaabada 7aad</b>	Hubinta caafimaadka
<b>Talaabada 8aad</b>	Hubinta guud
<b>Talaabada 9aad</b>	Wareysiga guddiga

# Waa maxay mushaarka iyo faai'dooyinka noqoshada sarkaalka Booliiska?

- Mushaar saleed tartan leh laga bilaabo maalinta kowaad ee tababarka Akadeemiyada
- Kororka mushaarka sannadlaha ah iyo gunooyinka shiftiga dheeraadka ah oo la socda mushaarkaaga asaasiga ah
- Baakeejka Superannuationka oo deeqsi ah
- Fasax ilaa 9 asbuuc sannadkii
- Fasaxa xooggaga difaaca; fasaxa umusha / waalidnimada; fasaxa waxbarashada; fasaxa adeegga dheer
- Fasaxa addeegga dheer
- Yunifoom laysa-siinayo
- Fursadaha waxbarashada iyo horumarka joogtada ah intaad ku jirto mihnaddaada.

## Waa maxay tababarka aan qaadan doono Sarkaal Booliis ahaan?

Tababarkaaga kowaad ee 2da sano ee ugu horreysa iyo 12ka asbuuc ee shaqadaada Victoria Police waxaa ka mid ah:

<b>ASBUUCA 1 – 12</b>	<p>Asbuucaaga kowaad ee Akadeemiyada wuxuu noqonayaa asbuuca soo-dhaweynta, oo u xilsaaran in la baro shaqaalaha cusub arimaha Victoria Police ka haya'd ahaan.</p> <p>Tababarka Akadeemiyada wuxuu ku bilaaban doonaa sharciga, xirfadaha wada-hadalka, jimicsiga, ammaan howlgalka (oo ay ku jiraan hubka) iyo ka-qaybgelinta bulshada.</p> <p>Waxaa lagu dhaarin doonaa dhammaadka asbuuca 12aad, markaas oo aad bilaabi doonto POL50115 Diploma of Policing.</p>
<b>ASBUUCA 13 – 31</b>	<p>Tababarka ayaa ka socon doona Akadeemiyada ayadoo lagu darayo ka qabashada waajibaadka saldhigga booliiska, ayadoo la qaadanayo tababarka ka-warcelinta amarka dadweyne iyo ka-shaqaynta faanka qaybta oo tagaya dhacdooyinka rabshadda qoyska.</p> <p>Waajibaadkaaga hadba waa la sii balaarin doonaa intii aad hesho aqoonba, xirfado iyo waayo-aragnimo.</p>
<b>ASBUUCA 32 – 52</b>	<p>Waxaad qaadan doontaa ku-meelaynta saldhig booliis Akadeemiyada ka dib adigoo ah ka-warceliyaha kowaad waxaadna waqti ku qaadanaysaa laanta booliiska waddooyinka, oo ay ku jiraan highway patrol iyo RPDAS (qaybta booliiska waddooyinka iyo khamriga – booze baska).</p>
<b>ASBUUCA 53 – 116</b>	<p>Waxaad qaadan doontaa tababarkaaga darawalka waxaadna heli doontaa laysanka silfarka ah.</p> <p>Ballantaada ayaa la xaqiijin doonaa waxaana lagu gayn doonaa saldhiga tababarka adoo ah sarkaal booliis ee waajibaadka guud iyo howlaha shaqo dheeraad ah si lo dhammaystiro.</p>

Markay dhammaato muddadaasi, haddii aad dhammaysey shuruudaha oo dhan ee Diplomada Booliiska, waxaa lagu xaqiijin doonaa kaalintaada inaad tahay Police Constable waxaadna qaadanaysaa Diplomadaada.

Tababarkan hore waa bilowgii. Maaddaama aad tahay xubin Victoria Police waxaad sii wadi doontaa inaad sii qaadato tababarada ugaara shaqada intaad ku jirto mihnadaada oo dhan.

## Macluumaad dheeraad ah ma u baahan tahay?

Booqo: [www.policecareer.vic.gov.au/police](http://www.policecareer.vic.gov.au/police)

ama e-mail ku soo dir wax-weydiintaada: [rsbmarketing@police.vic.gov.au](mailto:rsbmarketing@police.vic.gov.au)

ama naga soo wac (03) 9247 3212

